

# **Victorian Seniors Festival 40 Years 2022**



**Somali**

## **Bandhiga Waayeelada Fiktooriya**

Dabaaldeegga sanadaha ah ee waayeelada Fiktooriya, Bandhigga Waayeelada Fiktooriya waxa uu dhacaan sanad kasta inta lagu jiro bisha Oktoobar oo dhan.

Bandhiga Waayeelada Fiktooriya waxaa ku jira kumanaan dhacdooyin oo bilaash ah iyo qiimo jaban agagaarka Fiktooriya, oo ay soo qabanaqabiyaan mid kasta oo ka mid ah 79-ka gole deegaan ee gobolka iyo 450 kooxood oo kale.

### **Ku biir madadaalada bisha Oktoobar**

Gole deegaan kasta waxay qaban qaabinayaan dabbaaldeegyo gaar ah iyo waxyaabo madadaalo ah si ay ugu dabaaldagaan waayeelada iyo odayaasha.

Waa kuwan qaar ka mid ah madadaalooyinka xiisaha leh iyo dhacdooyinka bilaashka ah ee ugu waaweyn ee aad ku raaxeysaneysyo.

### **Maalinta Dabaaldeegga, Axada 2-da Oktoobar 2022 Fagaaraha Federation Square, Melbourne.**

12PM Duhurnimo – 7:00PM

Dhacdo bilaash ah oo loogu talagalay waayeelada iyo asxaabtooda iyo qoyskooda.

Muusig aad u badan, qoob ka cayaar iyo bandhig. Bandhigyaada iyo macluumaad u taagan.

Furitaanka rasmiga ah ee Bandhiga 2022 iyo Kusoo Dhaweynta Dalka saacada marka ay tahay 1pm.

### **Xarunta Dabaaldeegga, Isniinta 3-da Oktoobar illaa Jimcaha 7-da Oktoobar 2022. Cirifka, Fagaaraha Federation Square Melbourne.**

Waxaa soo bandhiga Nurse Next Door Home Care Services (Kalkaalisada Ku Xigta Adeegyada Daryeelka Guriga)

Riwaayadaha Maalinlaho ah ee bilaashka ah, bandhigyo iyo kulamo aqoon isweydaarsi ah. 10:30AM ilaa 4:30PM

Qof walbo waa la soo dhaweynayaa waxaanahaynaa shaah iyo qaxwo bilaash ah oo la heli karo maalinta oo dhan.

Barnaamijka bandhigga Caweyska bilaashka ah 5:30 PM ilaa 7:30 PM.

### **Gaadiidka dadweynaha bilaashka ah ee dadka haysta Kaadhka Waayeeelada Fiktooriya**

Laga bilaabo Axada 2-da Oktoobar illaa Axada 9-ka Oktoobar 2022 dadka haysta Kaadhka Waayeeelada Fiktooriya waxa ay si bilaash ah ugu safraayaan:

- Tareenada, basaska korontada ku shaqeeya iyo basaska Melbourne
- Tareenada gobolka, basaska safarada dheer gala iyo basaska (ay ku jiraan adeegyada basaska ee gobolka magaalada).

### **Bandhigyaada onlaynka ee Bandhiga Waayeeelada Fiktooriya ee Bilaashka ah**

Sanadkan waxaan ku faraxsannahay inaan idin soo bandhigno barnaamijyo gaar ah oo maqal ah ee onlayn ah oo aad ku raaxeysataan, iyadoo lagu soo kordhinayo bandhigyo cusub bil kasta illaa Nofeembar.

Booqo [www.seniorsonline.vic.gov.au/festival-performances](http://www.seniorsonline.vic.gov.au/festival-performances) oo ku dhufo kaadhka si aad u dhageysatid bandhiga.

### **Wax badan ka ogoow**

- Booqo Onlaynka Waayeeelada si aad u hesho jadwalka dhacdooyinka Bandhiga gobolka oo dhan bisha Oktoobar [www.seniorsonline.vic.gov.au/festival](http://www.seniorsonline.vic.gov.au/festival)
- Kala xidhiidh golaha deegaankaaga dhacdooyinka deegaankooda ee agagaarkaaga ah.
- Ka soo wac adeega macaamiisha Kaadhka Waayeeelada 1300 797 210 inta u dhaxaysa 9:00AM-2:00PM maalmaha shaqada.
- Wixii caawinaad ah ee luuqadaha kale wac 131 450 oo weydii iney wacaan adeegga macaamiisha Kaadhka Waayeeelada 1300 797 210 inta u dhaxaysa 9:00AM-2:00PM maalmaha shaqada.

